

Marti-qaad Ka-soo-qaybgal Kulan loogu talo-galay Waalidiinta kuna saabsan Waalidnimada, mowduucyo la xirriira Daroogada & Carruurteena

Waalidiinta Sharafta leh,

Dhammaantayo waxaan wada qabnaa dareenka ah sida loola dhaqmo ama loogala hadlo dadkeena yar-yar, gaar ahaan mowduucyada aanu badanaa u aragno inay dhib-badan yihiin ama xasaasi yihiin sida daroogooyinka iyo isticmaalka daroogada.

Dugsigaagu wuxuu kugu marti-galinaya inaad ka soo-qaybgasho kulan war-galin iyo wada-tashi leh kuna saabsan mowduucyadaas, si gaar ahna loogu talo-galay waalidiinta _____ / _____ / _____ laguna qabanayo _____ laga bilaabo _____ ilaa _____. Cabbitaan iyo cunto fudud ayaa jiri doona.

Kulanku wuxuu qayb ka yahay barnaamiika ballaaran ee dugsigu ka leeyahay waxbarashada daroogada iyo kor-u-qaadidda iskaashiga waalidka iyo dugsiga. Waxay ku siinaysaa fursadda inaad ka hesho macluumaad sax ah daroogooyinka iyo mowduucyada la xirriira daroogada, oo ay ka midka yihiin si-xun u isticmaalka daawoooyinka iyo waxyaalahu sharci-darrada ah. Waxaa kaloo jirta fursadda ah inaad barato xeeladaha wada-hadalka qaarkood oo kaa caawin kara inaad mowduucyada uga wada hadashaan isla qoyska dhediisa.

Marti-galiye ay soo tababartay Wasaaradda Waxbarashada, Shaqada iyo Tababarka, kana socda Mashruuca Waxbarashada Daroogada ee waalidka ayaa xirriirin doona kulanka.

Waxaa filayaa inaad imaan doonto, galabtaas waxaa loogu talo-galay inay noqoto mid macluumad iyo xiisoba leh. Waad soo wadan kartaa xubin kale oo qoyskaaga ahna qof weyn ama saaxiibkaa. Tani waxay fursad u tahay dugsiga iyo waalidiinta inay wadajir uga shaqeeyaan sidii ay ay u taageeri lahaayeen carruurteena.

Waxaan sugaynaa inaan ku aragno.

Mahadsanidiin

—  —

Fadlan soo buuxi oo noo soo celi

Taariikhda:

Waqtiga:

Meesha:

Cabbitaan iyo cunto fudud ayaa jiri doona

Si ay noogu caawiso inaan keeno in nagu filan oo kuraas iyo Cabbitaan iyo cunto fudud ah fadlan soo celi warqaddan yar markay tahay _____

_____ waxaan imaan doonaa kulanka markay tahay _____

Waxaan keeni doonaa xubin qoyska ah oo weyn/saaxiib. Haa Maya

Saxiixa _____

Somali